

Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Qoor-gooyaha Bakteeriyada

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu waxa dhici karta inuu qaaday **qoor-gooyaha bakteeriyada (bacterial meningitis)**. Waa infakshan xangulada ah iyo dareeraha ku wareegsan maskaxda. Waxa lagu taliyey inaad la xidhiidho dhakhtarka ilmahaaga ama rugta caafimaadka una wargeliso sida ugu dhakhsaha badan, gaar ahaan haddii ilmahaagu uu leeyahay duuf ama duriga.

Waa maxay astaamuhu? Xummad sare, qandho, qoorta oo engegta, madax xanuun, diidista ilayska, iyo matag.

Sidee ku faaftaa? Qof ilaa qof waxa la isugu gudbiyaa neefta iyo waxyaalaha cunuhu soosaaro (dhunkashada ama qufaca). Sidoo kale waxay ku faafi kartaa wadaagista weelka sharaabka. laguma kala qaado hawada waana mid ka sahlan faafis durayga.

Goorma ayey astaamuhu bilaabaan inay muuqdaan? Saacado ilaa 7 maalmood

Ma loo baahan yahay in ilmaha guriga lagu hayo? Haa. Ilmuhu waa inuu caddayn ka haysto bixiyahaaga caafimaadka si uu dugsiga ugu soo laabto.

Qoor-gooyaha bakteeriyadu wuxuu noqon karaa mid aad u daran wuxuuna horseedi karaa waxyaalo kale isaga oo keenaya dhaawac maskaxda ah ama naafo. Haddii ilmahaagu muujiso wax kamid ah astaamahaan raadso daryeel caafimaad isla markaaba. Haddii ilmahaaga laga helay qoor-gooye fadlan ogaysii xaruntaada Head start/ECEAP.

Shaqaalaha: _____ Taleefanka: _____

Xarunta: _____